



Xafiiska Qaramada Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Siyaasadda Soomaaliya (UNPOS)

WARSAXAAFADEED 03/2011

Ergeyga Gaarka ah ee Qaramada Midoobay u qaabilsan Soomaaliya: Xilliga Ku Meergaarka ah waa inuu dhammaado bisha Agoosto

Nayroobi, 26 Janaayo 2011 – Ergeyga Gaarka ah ee Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay u qaabilsan arrimaha Soomaaliya, Dr. Augustine P. Mahiga, ayaa sheegay in kulan gaar ah oo heerkiisu sareeyo loogana hadlayo arrimaha Soomaaliya uu ka dhici doono magaalada Addis Ababa. Shirkan waxaa la qabanayaa inta uu socdo Shirmadaxeedka Ururka Midowga Afrika oo maanta ka furmay magaalada Addis Ababa. Shirkan heerka sare waxaa si wadajir ah u qaban doona Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay, Mr. Ban Ki-moon iyo guddoomiyaha Guddiga Ururka Midowga Afrika, Mr. Jean Ping. Waxaana shirka dib loogu eegayaa xaaladda geedisocodka nabadda Soomaaliya. Shirku wuxuu ku soo beegmay xilli geedisocodka nabadda Soomaaliya uu marayo marxalad aad u muhim ah, ayuu yiri Dr. Mahiga.

“Dhammaadka xilliga ku meelgaarka waxaa nooga harsan toddoba bilood oo keliya, welina waxaa harsan wax badan in la qabto”

Dr. Mahiga ayaa sheegay in Dowladda Federaalka Ku Meergaarka ah ay diyaarisay qorshe hawleed qeexaya hawlaha muhimka ah ee ay doonayso inay qabato inta uusan dhammaan xilliga ku meelgaarka ah.

“Waxaa si guud ah la isugu afgartay, ha ahaato dalka gudihisa iyo dibaddiisaba, in xilliga ku meelgaarka ah uu dhammaado bisha Agoosto sida ku cad Heshiiskii Jabuuti. Inta ka horeysa waqtigaana waxaa soconaya wadatashi lagu gaarayo isafgarad ku saabsan sida lagu dhammeynayo xilliga ku meelgaarka ah iyo sida uu noqonayo hanaanka siyaasadeed ee jiri doona xilliga ku meelgaarka ka dib”, ayuu yiri Dr. Mahiga.

Isafgarad laga garaaro hanaanka siyaasadeed ee imanaya dhammaadka xilliga ku meelgaarka ka dib waa inuu ku billowdo wadatashi dhexmara Soomaalida si uu u noqdo mid loo wada dhanyahay kana wada qaybgalaan dhammaan dadka ay arrintu khuseyso si isafgarad looga gaaro wixii laqaban lahaa arrimaha mustaqbalka, ayuu ku nuuxnuuxsaday Dr. Mahiga.

Wixii war dheeraad ah fadlan kala xiriir: Susannah Price ama Donna Cusumano, saraakiisha qaabilsan isgaarsiintab guud, Xafiiska Qaramad Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Siyaasadda Soomaaliya, Nairobi

Tel: +254 20 762 6805 / 6869 ama +254 733902020 ama 737400133

Fadlan eeg rugta Internet-ka (website):

www.unpos.unmission.org



Xafiiska Qaramada Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Siyaasadda Soomaaliya (UNPOS)

Dr. Mahiga ayaa sheegay in habka wadatashiga lagu gaarayo isafgaradka uu mar horeba ka dhex billowday Hay'adaha Federaalka Ku Meelgaarka ah. Waxaana wadatashigaasi wada Madaxweynaha, Guddoomiyaha Parlamaanka iyo Ra'iisal Wasaaraha. Ka dib markuu warbixin ku saabsan wax qabadka (Dowladda) uu siiyay Golaha Amaanka horaantii bishan, Dr. Mahiga wuxuu billaabay la wadatashi uu la sameynayo waddamada ay arrintu khuseyso ee Gobolka iyo Bulshada Caalamka inteeda kale.

“Waxaa muhim ah in habka isafgaradka ku dhisan uu xaqiijiyo hanashada horumarka ilaa iyo hadda la gaaray, ayna qayb ka ahaadaan waxyaalaha jiri doona xilliga ku meelgaarka ka dib”, ayuu yiri Dr. Mahiga.

Dr. Mahiga ayaa kalsooni ka muujiyay in dadka Soomaaliyeed oo kaashanaya Bulshada Caalamka ay gaari doonaan yididiiladooda ay muddada dheer u hayeen inay arkaan nabad iyo xasillooni waarta oo ku soo noqota waddankooda.”

“Labaatan sanno oo dhibaato iyo rafaad ah ka dib waxaa la gaaray waqtigii Soomaaliya ay mar kale ku soo noqon lahayd qarannimadeedii muwaadiniinteeda ay heli lahaayeen fursad nololeed oo miro dhal ah kuna qotonta nabad iyo xasillooni.”

Wixii war dheeraad ah fadlan kala xiriir: Susannah Price ama Donna Cusumano, saraakiisha qaabilsan isgaarsiintab guud, Xafiiska Qaramad Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Siyaasadda Soomaaliya, Nairobi

Tel: +254 20 762 6805 / 6869 ama +254 733902020 ama 737400133

Fadlan eeg rugta Internet-ka (website):

www.unpos.unmission.org